Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-, MAAHANMUUTTO- JA KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

# Waraysiga-Dublin ee Hoggaanka socdaalka ee lala yeelanaayo ilmaha aan waalidkiis la socon

Waxaa adiga laguu yeeray waraysiga lagugu dhegeysanaayo ee Hoggaanka Socdaalka. Hagistaan waxaa ay kuu sheegeysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga la xiriira waraysiga lagula yeelanaayo. Adiga iyo wakiilkaaga wada akhriya. Haddii wax uun ka mid ah arrinkaan aad fahmi weyso, waxaad faahfaahin dheeraad ah weydiisataa wakiilka ama shaqaalaha Hoggaanka socdaalka, bilowga hore ee waraysiga.

## Waa maxay ujeeddada dhegeysiga?

- Waxaad Finland ka codsatay magangalyo. Hoggaanka socdaalku si dhab ah uma falanqaynaayo codsigaaga, kahor inta laga ogaanaayo, waddankee ayaa ka mas'uul ah falanqaynta codsigaaga.
- Waxaa dhegeysiga lagu caddayn doonaa arrimaha saamaynta ku yeelan kara, in codsigaaga lagu falanqayn doono Finland, ama in aan la baari doonin iyo inkale. Dhegeysiga laguma falanqaynaayo waxyaabihii sababta u ahaa codsiga magangalyoddoonka.
- Dalka codsigaaga lagu falanqayn doono ayaa la go'aamin doonaa, iyadoo lagu salaynaayo nidaamka waafaqsan waxa loogu yeero xeerka Dublin, kaasoo qayb ka ah sharciga Midowga Yurub.
- Iyadoo lagu salaynaayo nidaamka dhegeysiga-Dublin, ayaa Hoggaanka socdaalku wuxuu caddaynayaa, dalka ka mas'uulka ah codsigaaga, iyo in codsigaaga lagu falanqayn karo Finland iyo inkale.
- Waddamada Dublin waa dhammaan kuwa ku jira ururka midowga yurub iyo dalalka kala ah Norwey, Swizerland, Iceland iyo Liechtenstein.

- Waa la iska dhaafi karaa baaritaanka codsigaaga, haddii aad sharciga badbaadada caalamiga ah ka heshay dal kale oo ka tirsan waddamada Midowga yurub. Markaas arrinku waxaa weeye nidaamka Dublin. Xaaladdaan sidaan ah waxaa dhegeysiga lagu caddaynayaa arrinka ah, waa maxay sababta ay tahay in codsigaagaa lagu baaro Finland, iyadoo aan arrinkaas loo eegeyn.
- Haddii ay Finland joogaan dad ka mid ah xubnaha qoyskaaga, waxaad sharciga degganaanshaha ama ciqaamadda ku codsan kartaa sababta ah xiriirka qoysnimo. Waa in aad samaysaa codsiga sharciga degganaanshaha oo gaar ah, kaasoo ah mid lacag la bixinaayo.

## Waa maxay xuquuqaha aad leedahay inta uu socdo dhegeysigaan?

- Wakiilkaaga ayaa kuu soo raacaya marka waraysiga lagula yeelanaayo
- Waxaad xaq u leedahay waraysigaan inta uu socdo, inaad qabsato qareen kaa caawiya arrimaha sharciyada.
- Wakiilkaaga ayaa xil iska saaraaya haddii aad u baahato in aad hesho qof caawiye ah oo kula jooga waraysiga. Haddii aadan raadsan caawiye kula jooga dhegeysiga, si kastaba waan samayn karnaa dhegeysiga iyadoo uusan caawiyuhu joogin.
- Waxaa waraysiga kula jooga turjubaan. Turjubaanku wuxuu si dhexdhexaad ah isagoo aan cidna la jirin, uu u turjumayaa dhammaan wixii waraysiga dhexdiisa lagu sheego. Turjubaanku wuxuu noqon karaa mid goobta waraysigu ka dhacaayo jooga, ama khadka telefoonka ku turjumaaya, ama fiidiyoow ahaan u turjumaaya.
- Qofka dhegeysiga qaadaaya, turjubaanka, wakiilka iyo qareenkaba waxaa saaran waajibka ah in ay sirta qariyaan, taasoo loola jeedo in aanay cid kale oo arrinkaan ka baxsan u sheegi karin wixii ay ka maqleen waraysiga dhexdiisa. Sidoo kale dukumintiyada adiga ku khuseeya waa sir la qarinaayo. Waan ka qarin karnaa arrimaha aad sheegtay xubnaha qoyskaaga, haddii sheegista arrimahaas ay khatar ama dhibaato ku keenayaan adiga ama ehelkaaga. Waxaad ku sheegi kartaa dhegeysigaan dhexdiisa wixii adiga fikirkaaga ah.
- Hoggaanka socdaalka wuxuu raadin karaa, oo raadraac uu ku samayn karaa qofka mas'uulkaaga dhabta ah. Mas'uulkaaga dhabta ah waxaa loola jeedaa, qofka adiga ku daryeelaayay markii aad joogtay dalkaaga hooyo. Raadraacaas waxaa loo adeegsanayaa oo keliya macluumaadka lagammamaarmaanka u ah dhanka raadraacista. Hoggaanka socdaalku wuxuu raadraacaas u samaynayaa, qaab aanay wax dhibaato ah ka soo gaaraynin adiga iyo ehelkaaga toonna.

## Waa maxay waajibaadka ku saaran adiga dhegeysigaan dhexdiisa?

- Waa arrin ay dantaadu ku jirto, in aad si xaqiiqda ku salaysan oo run ah u sheegto dhammaanba arrimaha saamaynta ku yeelanaaya dhegeysiga.
- Waa arrin ay dantaadu ku jirto in aad sheegto arrimaha adag ama dhibka badan.

- Runta sheeg. Haddii aadan xusuusan ama aadan garanayn waxa lagu weydiiyay, ha isku dayin inaad jawaabta wax uun iska allifto ama iska hindisto. Waxaad tiraahdaa, ma aqaan ama ma xusuusto. Haddii aad runta sheegi weydo, waxaa arrinkaas uu hoos u dhigayaa rumaysashada la rumaysan lahaa wixii aad sheegtay.
- Marka lagu waraysanaayo waxaad sheegtaa magacaaga iyo taariikhda dhalashadaada ee saxda ah. Haddii aadan haysan dukumintiyo lagu xaqiijin karo aqoonsigaaga, waa in aad si kasta oo awooddaada ah isugu daydaa in aad hesho dukuminti, islamarkaana aad u soo gudbisaa Hoggaanka socdaalka. Dukumintiyadaas waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan, dukumintiyada aqoonsiga shakhsiyadeed ama baasaboorka safarka. Waxaad hadhoow macluumaadka shakhsi ahaaneed ku beddali kartaa, marka aad keento dukuminti dawladeed oo la aamini karo oo ku saabsan macluuumaadka shakhsiga.
- Hoggaanka socdaalka waxaa uu ku keydinayaa aqoonsigaaga shakhsiyadeed iyo hawalaha la xiriira codsigaaga, nidaamka falanqaynta arrimaha ajaanibta, kaasoo ah nidaam dawladeed.
- In la siiyo hay'adaha dowladda macluumaad shakhsiyadeed aan sax ahayn ama xog aan sax ahayn oo loo gudbiyo diiwaanka dowladda, waa fal-dambiyeed ciqaab lagu mutaysanaayo. Finland mas'uuliyadda fal-dambiyeedku waxaay saarantahay dhammaan dadka 15 sano jirsaday.
- Waxaad ogaataa in siinta macluumaad shakhsiyadeed oo aan sax ahayn ama qarinta macluumaadkii saxda ahaa, ay kugu keeni karto in lagaala noqdo sharcigii oggolaanshaha ee lagu siiyay, islamarkaana waxaa ay dhibaato ku noqonaysaa oo adkaynaysaa falanqaynta arrimaha kale ee adiga ku khuseeya.

## Sidee ayaa dhegeysiga loogu soo diyaargaroobayaa?

- Waraysiga kahor isla soo akhriya adiga iyo wakiilkaaga, oo u kuurgala dhammaan hagista iyo qoraallada ay ku siiyeen hawlwdeennada dowladda. Waa muhiim sidoo kale in aad soo fiirfiiriso qoraallada ku saabsan nidaamka Dublin. Haddii aadan qoraalladaas haysanin, waxaad ka heleysaa bogga Hoggaanka socdaalka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/esitteet. Warbixinnadu waxaa ay ku hoos jiraan cinwaanka ah "Turvapaikka ja Dublin-menettely" oo loola jeedo "Magangalyada iyo nidaamka Dublin".
- Haddii aad haysato sabab sax ah oo aad ku doonayso, in turjubaanku uu noqdo qof dumar ah ama nin, waxaad arrinkaas u sheegtaa wakiilkaaga wakhti ka horreeya xilliga waraysiga. Isaga ayaa codsigaaga u soo gudbin doonaa Hoggaanka socdaalka. Hoggaanka socdaalka ayaa qiimayn ku samaynaaya, in sababtaasi ay tahay mid wax sax ah ku salaysan iyo inkale.
- Haddii xaaladdaada caafimaad ee jir ahaaneed ama nafsad ahaaneed ay tahay mid saamayn ku yeelan karta waraysiga, waxaad arrinkaas hore ugu sheegtaa wakiilkaaga ama shaqaalaha xerada qaxootiga.
- Xerada qaxootiga ayaa xil iska saaraysa arrinka ku saabsan, sidii aad ku imaan lahayd goobta waraysiga. Wakhti hore isla qorsheeya adiga iyo wakiilkaaga nidaamka safarka.
- Waxaad xerada qaxootiga ka codsan kartaa cunto aad hore u soo qaadato ama lacag aad ku qadayso.

- Hore u soo qaado wixii daawo ah ee aad maalinkaa u baahan tahay.
- Hore u soo qaado dukumintiyada iyo caddaymaha la xiriira codsigaaga.

## Sidaan soo socota samee maalinka waraysiga ee aad joogto Hoggaanka socdaalka

- Dhegeysiga dib uma dhigi kartid, wax sabab la aqbali karo ah la'aanteed. Haddii aad xanuunsato maalinka dhegeysiga, sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg xeradaada qaxootiga. Waa in wakiilkaaga uu u soo gudbiyaa Hoggaanka socdaalka, warqadda dhakhtarka ama kalkaalisada ee ku saabsan xanuunkaaga, ugu dambayn 1 toddobaad gudihiis, laga soo bilaabo maalinkii dhegeysiga. Haddii aad ka joogtay dhegeysiga magangalyoddoonista, adigoo aan haysan wax sabab la aqbali karo ah, codsiga waxaa go'aan laga gaari karaa iyadoo aan wax waraysi ah lagaa qaadin.
- Wakiilkaaga ama caawiyahaaga ayaa kula joogaya oo kaala qaybqaadanaaya waraysiga.
- Marka aad timaaddo goobaha Hoggaanka socdaalka, waxaa dhici karta in lagugu sameeyo baaritaanka dhanka ammaanka ah.
- Tus kaarkaaga macmiilka ee xerada qaxootiga, waardiyaha Hoggaanka socdaalka.
- Goobta ku sugitaanka waxaa imaan kara oo keliya dadka loogu yeeray dhegeysiga, iyo shakhsiyaadka kale ee hore loogala heshiiyay Hoggaanka socdaalka.
- Haddaad u baahan tahay qof caawiye ah, waa in ay wakiilka ama qofka caawiyaha ah arrinkaas hore qoraal ahaan ugu soo weydiiyaan Hoggaanka socdaalka. Xaaladaha kale, waraystaha ayaa go'aan ka gaaraya bilowga waraysiga, in qofka caawiyaha ah uu waraysiga joogi karo iyo inkale. Qofka caawiyaha ah ma ahan caawiye dhanka sharciyada ah, mana ka qayb qaadan karo caddaynta arrimaha waraysiga.
- Waraystuhu waa qof shaqaale ah oo ka tirsan Hoggaanka socdaalka. Isagu waa qof jooga goobta dhegeysiga uu ka dhacaayo, ama wuxuu uga qaybqaadanayaa dhanka fiidiyowga.
- Dhegeysiga waa la duubayaa. Waxaa intaas dheer oo qolka ku jira kaameradda amniga oo wax duubaysa.
- Haddii loo baahdo waxaan inta waraysigu uu socdo qaadan karnaa xilliyo nasasho ah. Adiga laftigaaga markii aad u baahato waad codsan karaa biririfta ama nasashada.

## Maxaa dhacaya dhegeysiga dhexdiisa?

- Marka ugu horraysa qofka waraysiga qaadaaya wuxuu kuu sheegayaa, waxyaabaha la samaynaayo waraysiga dhexdiisa, wuxuuna hubinayaa in aad fahamtay xuquuqdaada iyo waajibaadka lagugu leeyahay iyo inkale. Haddii aadan waxyaabaha qaarkood fahmin weydii qofka waraysiga qaadaaya. U sheeg waraystaha haddii aadan fahmin hadalka turjubaanka.
- Waraysi qaaduhu wuxuu ku weydiin doonaa arrimaha soo socda:
  - aqoonsigaaga shakhsiyaydeed

  - macluumaadka ku saabsan qoyskaaga iyo qaraabadaada ku sugan Yurub dhexdeeda.
  - macluumaadka ku saabsan sharciga degganaanshaha dalka, fiisooyinka iyo codsiyada magangalyoddoonka ah ee waddamada kale.
  - macluumaadka ku saabsan joogitaankaagii yurub gudaheeda kahor intaadan imaan Finland.
  - waddooyinkii ama marinnadii safarkaada ee aad u soo martay dalkaan Finland
  - sababaha aan iyaga awgood laguugu celin karin dal kale.
  - sababaha ay tahay in codsigaaga lagu falanqeeyo Finland gudaheeda, haddii aad sharciga badbaadada caalamiga ah ka heshay dal kale.
  - sidee ayaad u aragtaa dal ka saarista iyo diidmada dal soo gelitaanka.

- Wakiilka ama caawiyaha midkoodna kama jawaabi karo su'aalaha adiga lagu weydiinaayo. Inta waraysigu socdo waa ay kula talin karaan, waxaana ay ku soo xusuusin karaan arrimha muhiimka ah ee aad hore ugu sheegtay.

- Hoggaanka socdaalka waxaa uu waraysiga kaaga dhegeysan karaa, caddaymaha saamaynta ku yeelan kara go'aanka arrinkaaga. Tusaale ahaan, haddii adiga lagugu tuhunsan yahay dambi aad ka samaysay Finland gudaheeda, amaba lagugu xukumay dambi aad ka gaysatay Finland gudaheeda, waxaa arrinkaas uu saamayn ku yeelan karaa falanqaynta codsigaaga ee Hoggaanka socdaalka. Hoggaanka socdaalka waxaa haddii loo baahdo inta dhegeysigu uu socdo, uu adiga ku siinayaa fursad aad ku sheegi karto fikirkaaga la xiriira arrinka.

- Waraysi qaadaha ayaa kombiyuutarka ku qoraaya, waxa lagu sheego waraysiga dhexdiisa. Qoraalka waraysiga laga qoray waxaa la dhahaa qoraalka wayrisiga. Iyadoo ay ku xiran tahay wixii looga hadlay dhegeysiga, ayaa waxaa dhici karta in qoraalka aan la hubin, ama in qoraalka lagula hubiyo, ama in laguu qabto wakhti kama damabys ah oo aad ku soo gudbin karto wixii sixitaan ama wax ku kordhin ah ee waraysiga la xiriira. Qofka ku waraysanaaya ayaa kuu sheegi doona inta dhegeysiga lagu jiro sida warbixintaas loo maareynaayo. Koobiga dukumintiga qoraalka waxaa la siin doonaa wakiilkaaga.

## Qaabkee ayaa Hoggaanka socdaalku uu ku gaaraa go'aanka?

- Nidaamka-Dublin waxaa lagu qeexaa sababo kala duwan, kuwaasoo iyadoo lagu salaynaayo uu waddan ka mid ah wadamadaas mas'uul ka yahay falanqaynta codsigaaga. Sababahaasi waxaa ay kala yihiin: 1) xubnaha qoyska ee jooga waddamada Dublin, 2) ciqaamadda ama fiisaha waddamada Dublin, 3) joogitaan ama soo dhexmarid waddamada Dublin, 4) codsi magangalyoddoonis ee hore. Hoggaanka socdaalku waxaa uu u hubinayaa dhammaanba sababahaas sida ay u kala muhiimsan yihiin, isagoo raacaya nidaamka-Dublin ee arrinkaas laga dejiyay.

- Hoggaanka socdaalka waxaa uu ku gaarayaa go'aanka arrinkaaga ku saabsan isagoo ku salaynaaya macluumaadkii aad ku siisay waraysigii lagula yeeshay iyo wixii kale ee caddayn ah ee aad u soo bandhigto. Hoggaanka socdaalku waxaa sidoo kale

uu ka raadin karaa macluumaadka la xiriira dhanka go'aanka, ilaha guud ee dadweynaha.

- Haddii aad doonayso in aad hadhoow soo gudbiso caddaymo dheeraad ah, waxaad u dhiibtaa wakiilkaaga ama caawiyahaaga, kuwaasoo u soo gudbin doona Hoggaanka socdaalka. Arrinkaaga telefoonka ugama wada hadlaynno, waayo ma xaqiijin karno aqoonsiga shakhsiyadeed ee qofka na soo wacaaya.
- Haddii la go'aamiyo in dib laguugu celiyo dal kale, waxaad racfaan ka qaadashada go'aankaas u gudbin kartaa maxkamadda. Sidoo kale waxaad maxkamadda ka codsan kartaa arrinka ah, in aad sii joogto Finland tan iyo inta maxkamaddu ay ka falanqaynayso racfaankaaga.
- Haddii codsigaaga aan lagu falanqayn Finland, dib ayaa laguu celin karaa waxaana la amri karaa in laguu diido inaad Finland soo gasho.